

# Premium Assistance Program Wind-Down Guidance for Employees of Child Care Facilities

Kaalmada Lacagta Caymiska Waxay Dhamaansyaa Diseembar 31, 2023

Horaantii Sebteembar, Washington Health Benefit Exchange ayaa u dirtay ogaysiisyo faahfaahinaya in Barnaamijka [Health Care Premium Assistance for Employees of Child Care Facilities](#) ayaa dhamaan doona kadib dhamaad 2023. Midani waxay ka micnaysantahay haddii aadan u qalmin lacagta caymiska qorshaha Cascade Care oo dhan \$0, waxaad mas'uul ka noqon doontaa bixinta khidmadaha daryeelka caafimaadka bishii **laga bilaabo Janaayo 1, 2024**.

## Hagitaanka DCYF

Inkasta oo barnaamijkan kaalmada lacagta caymiska uu dhamaanayo, waxaa laga yaabaa inaad weli u qalanto kaydka dawladda dhexe iyo gobolka si loo yareeyo kharashaadkaaga. Qorshayaasha daryeelka Cascade Care oo lacag la'aan ah ama qiimo jaban ah ayaa loo heli doona shaqaalaha ugu saameynta badan iyadoo la adeegsanayo Washington Healthplanfinder. La xiriiir Yakima Neighborhood Health Services kahor, ama inta lagu jiro is-diiwaangelinta furan, si aad u ogaato kharashka ku kacaya khidmadaha daryeelka caafimaadkaaga.

## Wakhtiga kama Dambaysta ah ee Isdiiwaangelinta Furan

Isdiiwaangelinta furan iyada oo loo adeegsanayo ashington Healthplanfinder waxay ka bilaabanaysaa **Noofeembar. 1, 2023 - Janaayo 15, 2024**. Haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo dib u eegista ikhtiyaraada qorshaha iyo qiimaha qorshahaaga, fadlan la xiriiir Yakima Neighborhood Health Services. Hagayaashani waxay diyaar u yihiin inay kaa caawiyaan inaad ogaato kaydka aad u qalanto iyo qorshaha ugu fiican ee ku haboon baahiyahaaga daryeelka caafimaadka.

## Xiriirka

Fadlan kala xiriiir [Yakima Neighborhood Health Services](#) lambarka 509-574-0826 ama iimaylka [cnavi@ynhs.org](mailto:cnavi@ynhs.org) si aad wax badan uga ogaatid.



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**